



Nidaamka Aqoonsiga Early Achievers

Maxay: Kaqaybqaatayaasha u-qalma waxay ku helayaan shan dhibcood oo dheeraada ah qiimayntooda u dambaysa, iyo sidoo kale Qaybta Aqoonsiga ee Aagga Takhasuska ee shahaadadooda qiimaynta.

Ayo: Dhammaan daryeel-bixiyayaasha carruurta ee si buuxda aqoonsi uga haysta hay'adaha si rasmi ah ay u aqoonsadaan Kooxda Dib-u-eegista Aqoonsiga Early Achievers. Wakhtigan, hay'aduhu si rasmi ah loo aqoonsan yahay waa:

- Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Da'da Yar (National Association for the Education of Young Children, NAEYC)
- Ururka Qaranka ee Daryeelka Ilmaha Qoyska (National Association for Family Child Care, NAFCC)
- Ururka Ameerikaanka ee Montessori (American Montessori Society, AMS)
- Gudida Aqoonsiga Qaranka (National Accreditation Commission, NAC)
- AdvancED

Goorma: Waxaa la eegaa aqoonsiga wakhtiga la uruurinayo macluumaadka Early Achievers.

Waayo: Nidaamka aqoonsiga Early Achievers waxay aqoonsadaan daryeel-bixiyayaasha ka qaybgalaya ee muujiya inay ka go'an tahay tayadu kaas oo ay ku gadhayaan nidaamka aqoonsiga.

Sidee: Kaqaybqaatayaasha u-qalma waxay ku heli doonaan shan dhibcaha aqoonsiga ah darajayntooda, iyo sidoo kale Qaybta Aqoonsiga ee Taqasuska Shahaadadooda Early Achievers. Si ay u helaan dhibcaha aqoonsiga, daryeel-bixiyayaashu waa inay:

- Waxaa inay keenaan shahaado iminka ah ama waraaqo kale inta lagu jiro uruunta macluumaadka sheegaya in xarunta si buuxda ay u aqoonsan tahay hay'ad buuxisay shuruudaha aqoonsiga Early Achievers.
- Ku dokumenti gareeyaan aqoonsiga hadda Agabka Diyaar U Ahaanta Qiimiyanta Isdhaxgalka (Interactive Rating Readiness Tool, IRRRT), oo ay ku jirto goobta shahaadadooda aqoonsiga ee hadda sii uu u xaqiijiyo xog-ururiyaha.
- Kaqaybgalaan xog ururinta buuxda oo buuxiyaan shuruudaha buundada ugu yar ee ERS iyo CLASS.



Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo

Xaruntayda la aqoonsan yahay hore ayaa loo qiimeeyay. Wali miyaan u qalmaa dhibcaha aqoonsiga?

Barnaamijyada ay aqoonsadeen hay'ado ay aqoonsan yihiin Waaxda Waxbarashada Hore (Department of Children, Youth, and Families, DCYF) way u qalmaan dhibcaha aqoonsiga iyo aqoonsiga darajaynta xigta ee la muddeeyey, darajaynta lagu celinayo ama darajaynta la cusboonaysiinayo. Nidaamka aqoonsigu ma aha mid laga noqon karo. Laakiin, kaqaybgalaha daryeel-bixiyaha la darajeeyey waxa uu dalban karaa Aqoonsiga Aag Gaar ah ee Taqasuska, taas oo ah shahaado aqoonsi oo xarunta u qalanta boosta loogu soo dirayo. Si aad u dalbato Aag Gaar ah, fadlan nuqul shahaadada wakhtigan ah ugu soo dir iimeylka Early Achievers QRIS@dcyf.wa.gov.

Barnaamijka aqoonsiga xaruntaydu kuma jiro liiska hay'adaha aad aqoonsan tihiin. Nidaamkani muu i qabanayaa aniga?

Wakhtigan, NAEYC, NAFCC, NAC, AMS iyo AdvancED waxay buuxiyeen shuruudaha Early Achievers ee barnaamijka aqoonsiga. Nidaamka arjigu wuu u furan yahay dhammaan hay'adaha aqoonsiga. Fadlan la xidhiidh hay'addaada aqoonsiga si aad u aragto haddii ay bilaabeen Arjiga Early Achievers ee Aqoonsiga Hay'adda.

Waxaan ahay daryeel-bixiye AMS aqoonsan tahay waxaan isku diyaarinayaa darajaynta. Maxay tahay inaan sameeyo si aan u helo dhibcaha aqoonsiga iyo Aagga Gaarka ah?

Waa inaad muujisaa in xaruntaada lagu aqoonsaday Qalabka U-diyaarsanaanta Darajaynta Isdhexgalka (IRRT) oo aad la timaaddaa shahaado la aqoonsan yahay oo wakhtigan ah oo ay qiimeeyaan cida macluumaadka ururinaysaa. DCYF waxay si toos ah ugu daraysaa dhibcaha aqoonsiga dhibcahaaga qiimaynta kama danbaysta ah.

Waxa la i aqoonsaday wakhtigii ugu danbaysay ee la i darajeeyey laakiin wakhtigan la ima aqoonsana. Iyada oo sidaa ay tahay dhibcaha ma heli karaa?

Barnaamijkaaga wakhtigan waa in la aqoonsan yahay wakhtiga uruurinta macluumaadka si uu ugu qalmo dhibcaha aqoonsiga. Haddii aad go'aansato inaad dib u cusboonaysiin ku samaysato aqoonsigaaga, waxaad u qalmi doontaa dhibcahan darajaynta wakhtiga xiga.

Shanta dhibcood may khuseeyaan qiimaynta aagga gaarka ah?

Maya. Dhibcahan waxaa loogu talagalay inay ahaadaan aqoonsiga dadaalkaaga iyo ballanqaadka tayada inta uu socdo nidaamka aqoonsigu. Waxaa lagu dari doonaa dhibcaha guud ee barnaamijkaaga.

Waxaan ahay daryeel-bixiye NAEYC aqoonsan tahay kaas oo lagu darajeeyey Heerka 2. Waa maxay sababta la ii siin waayay dhibcaha aqoonsigu?

Si aad ugu qalanto dhibcaha aqoonsiga, waa inaad heshaa dhibcaha ugu yar ee CLASS iyo ERS. Haddii aad hesho dhibcaha ugu yar wakhtiga dib-u-darajaynta oo haysta aqoonsiga iminka ah waxaad heli doontaa dhibcaha aqoonsiga wakhtigaas.

Waxaan wakiil u ahay hay'ad aqoonsi bixisa taas oo aan ku jirin liiska DCYF ansixisay. Siday hay'addaydu u noqon kartaa hay'ad la aqoonsan yahay?

Arjiga Aqoonsiga Hay'adda ayaa jira kaas oo loogu talagalay hay'adaha aqoonsiga qaranka kuwaas oo ugu yaraan saddex sano shaqaynayay oo maamulo ugu yaraan 100 goobood oo la aqoonsan yahay oo gobollo badan ku yaala, oo ay kamid tahay Washington. Arjiga waxaa laga dalban karaa iimeylka Early Achievers ee QRIS@dcyf.wa.gov.

